KU DHAQAN XAFIIS DAWLADEED

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad | Muqdisho, 1 Deshembre 1974 | L. 12

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 47, Tr. 23 Oktoobar 1974 — *Sharciga Jaamacadda.* Bog. 533

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 24 Oktoobar 1974, L. 127 — *Xeerka maamulka gudaha ee Jaamaacadda Ummadda.* » 543

XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 14 Nofembre 1974, L. 128 — *Qiimaha dhuxusha geedaha.* » 555

XEER WASAARADDA BOOSTA IYO ISGARSIINTA, Tr. 18 Nofembre 1974, L. 129 — *Tigidh cusub «sannadguurada 5aad ee Kacaanka.* » 556

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 23 Oktoobar 1974, L. 130 — *Dhul Dawladeed loona gacan geliyey (libera disponibilità) Jaalle Kaafiya Noowel Cabdi ku fadhiya mq. 532, kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan.* Bog. 557

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Nofembre 1974, L. 731 — *Cad dhul Dawladeed, la siiyey Jaalle Axmed Cabuud Baxashwaan, ku yaal Muqdisho, Degmada Shibis kuna fadhila mq. 1,416.* » 558

---

# BOGGA SEDEEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Abu Cusman. (254)* Bog. 560

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamed Xuseen Cosoble. (255)* » 561

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul *Jaalle Maxamuud Warsame Maxamuud. (256)* » 561

MAXKAMADDA GOBOLKA GEDO, Lumid Jeeg L. 003314 Sh. So. 50.000 — *Cusbitaalka Garbahaaray. (257)* » 562

SHARIKADDA GEET — *Ogeysiis isugu yeedhis. (258)* » 562

SHARICADDA MARMARKA — *Shir aan caadi ahayn (259)* » 563

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Lumid Buug lacageed, L. 3544, Sh. So. 476,20 — *Cusman Maxamed Saciid. (260)* » 563

# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

**SHARCI L. 47, Tr. 23 Oktoobar 1974.**

**Sharciga Jaamacadda.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii koowaad iyo tii labaab ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 10 ee 14kii Luuliyo 1969 ee lagu hirgeliyey Sharciga Lam. 6 ee 1dii Disambar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo Sharciga Dhismaha Jaamacadda;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qaybta 1aad

FASIRAAD

Qodobka 1aad

Haddii aan si kale loo micnayn, erayada soo socda waxaa loola jeedaa sida hoos ku qoran:

a) Jaamacadda — «Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed»;

b) Guddoomiyaha — «Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda»;

t) Wasaaradda — «Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare»;

j) Madaxweyne — «Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka»;

x) Xoghayaha Dawladda — «Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare»;

kh) Golaha Tacliinta — «Golaha Tacliinta ee Jaamacadda».

Qaybta 2aad

DHISMAHA IYO ULAJEEDOOYINKA JAAMACADDA

Qodobka 2aad

*Dhismaha*

1. Waxaa sharcigan lagu dhisayaa Jamacadda Ummadda Soomaaliyeed.

2. Jaamacadda waxay noqonaysa Wakaalad Madax bannaan oo leh astaan sharci ah.

3. Jaamacaddu, waxay awood u yeelan-kartaa inay la gasho heshiisyo (contract) dad ama xubno kale dalka gudihiisa ama dibadiisa.

Heshiisyadaas iyaga ahi waa inay ka socdaan siyaasadda Dawladda.

Qodobka 3aad

*Saldhigga Jaamacadda*

1. Saldhigga Jaamacadda waa inuu Muqdisho noqda.

2. Jaamacaddu waxay kulliyado ka samayn kartaa dalka Gobolladiisa kale.

Qodobka 4aad

*Ulajeedooyinka Jaamacadda*

1. Ujeeddada guud ee Jaamacaddu waxa weeye horumarinta Tacliinta Sare si loo gaaro horukac degdeg ah iyo isbeddel bulsho hantiwadaaga cilmiga ku dhisan ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliyeed, isla markaasna, la gaaro isku fillaan buuxda xagga shaqaalaha hawlkarka ah, si himilooyinkaas loo hirgeliyo, Jaamacaddu waa inay:

a) Nidaamisaa, ballarisaa, horayna u marisaa Tacliinta Jaamacadeed, iyadoo xil goonni ah iska saaraysa cilmiyada iyo hawlaha sida tooska ah u samaynaya himilooyinka hantiwadagga iyo midnimada Ummadda Soomaaliyeed;

b) Kor u qaaddaa cilmiga, isuna diyaarissaa horumarinta fidinta aqoonta Sayniska, Tekonolojiyada iyo waxbarashada;

t) Culays gaar ah saarto horumarinta iyo fidinta hantiwadaagga cilmiga ku dhisan iyo dhaqanka Ummadda Soomaaliyeed;

2. Intaas kor lagu soo sheegay ka sokow, Jaamacaddu waxay awood u leedahay:

a) Inay imtixaanno qaaddo, bixiso shahaadooyin sare, dibloo-

mooyin iyo marag kac (certificate) kale oo tacliineed;

b) Inay hibayso shahaadooyin sare, dibloomooyin sharafeed iyadoo tixgelinaysa Xeerka saamaynaya arrimahaas;

t) Inay qabato, maamushana wax kasta oo loogu deeq bixinayo (donations), deeq tacliineed (Scholarships);

j) Inay goyso, ururiso lacag kasta oo Jaamacaddu ujuuro ahaaan u soo gasha (Fees) ayadoo raacaysa xeeerka u degsan;

x) Inay qabato shirar aqooneed, ayna hirgeliso baarista cilmiga soo saarista kutubta.

3. Jaamacaddu wax kasta oo ay qabanayso waa inay ku dhisnaadaan mabadi'da Kacaanka iyo habka Hantiwadaaga Cilmiga ah.

Qaybta 3aad

## HABKA DHISMAHA

Qodobka 5aad

*Xubnaha*

Xubnaha Juumacadda waxay ka kooban yihiin:

1. Guddoomiyaha
2. Golaha Tacliinta
3. Hormuudyaal
4. Guddiyada Kulliyadaha
5. Xafiiska Diiwaaniyaha
6. Madaxa - Rugta - Kutubta
7. Waaxda Arrimaha Ardayda
8. Golayaasha Ardayda.

Qodobka 6aad

*Guddoomiyaha*

1. Jaamacaddu waa inay lahaataa Guddoomiye uu Madaxweynuhu magacaabayo isagoo la tashaday Xoghayaha Dawladda.

2. Guddoomiyuhu wuxuu jagadaas heyn karaa muddo 4 sannadood ah waana loo cusboonaysiin karaa.

3. Haddii Guddoomiyuhu maqnaado sabab la'aan, ama caafimaad-darro ama ku kaco ceeb sharafta Xafiiska wax u dhimayaa, ama xilkiisa ka soo bixi waayo, waxaa hawshiisa lagu warrejinayaa qof uu magacaabo Madaxweynaha isagoo la tashanaya Xoghayaha Dawladda.

Qodobka 7aad

*Hawlaha Guddoomiyaha*

1. Guddoomiyuhu wuxuu yahay sarkaalka ugu sarreeya maamulka iyo dhaqan gelinta Jaamacadda. Xilkaas siduu u guto wuxuu:

a) Guddoonshe ka noqonayaa Golaha Tacliinta;

b) Kala talinayaa Xoghayaha Dawladda wax kasta oo saameynaya hawlaha waxbarashada, dhaqaalaha iyo maamulka Jaamacadda;

t) Mas'uul ka yahay nidaaminta iyo fulinta habsan ee sharciyada Jaamacadda;

j) Sida xeerarka la dejiyey, dhigayaan, mas'uul ka yahay usluubta iyo edebta Jaamacadda dhexdeeda.

Qodobka 8aad

*Golaha Tacliinta*

Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Gole Tacliineed oo ka kooban:

1. Guddoomiyaha oo noqonaya Guddoonshaha.
2. Hormuudyaalka.
3. Diiwaaniyaha (Xoghaye).
4. Xubin guddiga Kulliyad kasta doorto sannadka tacliinta bilawgiisa.
5. Agaasimaha Waaxda Tacliinta Sare ee Wasaaradda.

Qodobka 9aad

*Hawsha Golaha Tacliinta*

Hawsha Golaha Tacliintu waxa weeye:

a) Habaynta tacliinta iyo nidaaminta waxbarashada iyo wixii la xiriira, fulinta toosan ee nidaamkaas iyo la socodka waxtarnimada nidaamkaas;

b) Hirgelinta nidaamka imtixaannada Jaamacadda, edebte, siyaasadda gelidda Jaamacadda iyo deeq tacliineedka;

t) Dibuqiimaynta Tacliinta, imtixaannada, xeerarka edebta iyo siyaasadda Guud ee Jaamacadda;

j) Hibaynta shahaadooyinka tacliineed ee lagu xusay qodobka 4aad qaybta 2 (b);

x) Talo-bixinta ku saabsan arrimaha Jaamacadda ee la warsado;

kh) Goluhu inuu noqdo Guddiga Gelitaanka Jaamacadda sannad walba marka arday cusub la qaadanayo;

d) Ilaalinta danaha ardada iyo barayaasha Jaamacadda iyo fulinta xeerarka usluubtooda;

r) Horumarinta baarista cilmiga.

Qodobka 10aad

*Hormuudayaalo*

1. Kulliyad kasta waxay yeelanaysaa Hormuud, uu magacaabo Xoghayaha Dawladda isagoo dhagaystay talada Guddoomiyaha.

Qodobka 11aad

*Hawlaha hormuudka kulliyadda*

1. Hormuudka Kulliyaddu wuxuu noqonayaa sarkaalka ugu sarreeya maamulka iyo tacliinta Kulliyadda, wuxuuna ka amar qaadanayaa Golaha Tacliinta iyo Guddoomiyaha. Guud ahaan wuxuu mas'uul ka yahay fulinta siyaasadaha Golaha Tacliinta u dejiyay kulliyadaha.

2. Si uu hawshiisa u fuliyo Hormuudku waa inuu:

a) Ilaaliyaa tacliinta kulliyadaa, asagoo la kaashanaya Guddiga Kulliyadda;

b) Mas'uul ka noqdaa dhawrista nidaamka habsan ee kulliyaddaiyo in xeerarkeeda sidii ay ahaayeen loo fuliyo;

t) Fuliyaa siyaasadaha Guddiga Kulliyadda;

j) Mas'uul ka noqdaa diyaarinta miisaaniyadda sannadka ee Kulliyadda;

x) Mas'uul ka noqdaa maamulka maaliyadda Kulliyaddaa.

Qodobka 12aad

*Guddiga Kulliyaddha*

Kulliyad kasta waxaa laga abuurayaa Guddi Kuliyadeed oo ka kooban:

a) Hormuudka Kulliyadda (Guddoonshe);

b) Madaxda waaxaha kulliyadda ee ku tilmaaman Qodobka 25aad ee Sharcigan. Madax waaxeed kasta wuxuu shirarka Guddiga la tegayaa talooyinka Sarayaasha waaxda.

Qodobka 13aad

*Hawlaha Guddiga Kulliyadaha*

Hawlaha Guddiga Kulliyaduhu waxay noqonayaan sida soo socota:

a) Inay niddaamiyaan wax kasta oo ku saabsan waxbaridda imtixaannada iyo fiirinta manhajka kulliyadda, iyadoo tixgelinayaa go'aannada Golaha Tacliinta, sharciga iyo xeerka u dagsan Jaamacadda;

b) Inay horumariyaan baarista cilmiga ee Kulliyadda;

t) Inay Golaha Tacliinta uga warramaan barnaamijka ku saabsan waxbarashada, shahaadooyinka sare, dibliimooyinka iyo wax kasta oo la xiriira hawlaha tacliinta ee Kulliyadda;

j) Inay Golaha Tacllinta talo ka siiyaan bixinta shahaadooyinka sare (kuwa aan ahayn shahaada sharafta) dibloomooyinka iyo deeq tacliineed;

x) Inay fiiro u yeeshaan wax kasta oo la xiriira hawlaha tacliinta ee Kulliyadda ee Golaha Tacliintu u soo gudbiso, dabadeedna ay isla Golahaas xogwarran ku soo celiyaan;

kh) Inay fuliyaan xeerarka edbinta ee gaarka ah.

Qodobka 14aad

*Xafiisyada Diiwaaminta (Registres' Office)*

1. Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Xafiiska diiwaaninta kana koobaan qaybaha hoos ku dhigan:

a) Qaybta Arrimaha Tacliinta;

b) Qaybta Maamulka;

t) Qaybta Shaqaalaha;

j) Qaybta Ilaalinta.

2. Qaybaha (a), (b) iyo (t) waxaa ka madax noqon doona kaaliyayaal Diiwaaniye. Qaybta (j) waxaa madax ka noqon doona Ilaaliye-Sare (Chier-Warden).

Qodobka 15aad

*Diiwaaniyaha*

Xafiiska kor ku magacaaban waxaa madax u ah Diiwaaniye uu magacaabo Xoghayaha Dawladda, isagoo dhagaystay Guddoomiyaha. Diiwaaniyuhu toos ahaan ayuu ka hoos shaqaynayaa Guddoomiyaha.

Qodobka 16aad

*Waajibka Diiwaaniyaha*

Diiwaaniyuhu wuxuu mas'uul ka noqonayaa iskudubaridka hagaagsan ee dhammaan qaybaha Xafiiska Diiwaaninta. Waxaa u raaca:

a) Inuu Guddoomiyaha ku kaalmeeyo diyaarinta, habaynta iyo sojeedinta siyaasadda Jaamacadda;

b) Inuu meel ku xafidaa shaabadda Jaamacadda, wuxuuna ku dhufanayaa Xaashiyaha rasmiga ah ee Jaamacadda (Official documents) isagoo raacaya tilmaamaha Golaha Tacliinta iyo wixii xeer ah oo la xiriira;

t) Inuu meel ku xafido xusuusaha (Records), Diiwaannada, Tiitollada (Titles) hawlaha iyo wixii la mid ah oo ay Jaamacaddu leedahay;

j) Inuu Guddoomiyaha ku kaalmeeyo wax kasta oo uu u baahdo, fuliyana waajibaadka kale oo Golaha Tacliinta uu faro;ee ?ee

x) Inuu Xoghaye u yahay Golaha Tacliinta iyo Guddiga Edebta ee Jaamacadda;

kh) Inuu diyaariyo Xaashiyaha cadeynaya heerka tacliinta (transcript) ee ardayda.

Qodobka 17aad

*Magacawga Kaaliyayaasha*

1. Guddoomiyaha ayaa magacaabaya kaaliyayaasha iyo ilaaliyaha sare ee lagu xusay qodobka 14aad, isagoo la tashanaya Golaha Tacliinta.

Qodobka 18aad

*Madaxda Rugta Kutubta*

1. Xoghayaha Dawladda oo dhagaystay Guddoomiyaha ayaa magacaabaya Maadaxda Rugta Kutubta;

2. Madaxda Rugta Kutubta waxaa loo xil saaray nidaaminta iyo hor-dhigga Rugta Kutubta ee Jaamacadda.

Qodobka 19aad

1. Waxaa la dhisayaa Waaxda Arrimaha Ardayda oo hoos imanaysa Guddoomiyaha;

2. Waaxdaas waxaa madax ka noqonaya Hormuudka Arrimaha Ardayda, kaasoo Xoghayaha Dawladdu magacaabayo ka dib markuu dhagaysto Guddoomiyaha.

3. Mormuudka waxaa kaalmaynaya kaaliyayaalka.

Qodobka 20aad

*Hawlaha*

1. Hawlaha Waaxdu waxay noqonayaan sidan soo socota:

a) Inay hanuuniso ardayda Jaamacadda soo gelaysa, had iyo jeerna talooyin siiso intay Jaamacadda joogaan;

b) Inay kor ka ilaaliso edebta iyo nolosha ardayda;

t) Inay ka shaqayso horumarinta caafimaadka, cayaaraha iyo hoyga ardayda Jaamacadda;

j) Inay diyaariso, habayso, fuliso ka qaybgalka ardayda xagga mashaariicda horumarinta dalka.

Qodobka 21aad

*Guddiga ardayda Kulliyadda*

1. Kulliyad kasta waxaa laga dhisayaa Guddi arday ah oo ka koobaan 7 qof, ardayduna ay soo doortaan bilowga sannad kasta ee tacliineed.

2. Guddi kasta oo ardayda Kulliyaddu ay leedahay wuxuu yeelanayaa Guddoonshe ay dooranayaan xubnaha kor lagu soo sheegay.

Qodobka 22aad

*Golaha Ardayda Jaamacadda*

1. Waxaa la dhisayaa Gole ardayda Jaamacadda ee ka kooban Guddoomiyayaasha Guddiyaaasha Kulliyadaha iyo xubin kale oo laga soo doortay Guddiyaasha Kulliyadaha kala duwan.

2. Guddoonshaha Golaha Ardayda Jaamacadda iyo saraakiisha kale waxa dooranaya Xubnaha Golaha Ardayda Jaamacadda.

Qodobka 23aad

*Hawlaha*

Hawlaha Guddiyada Golaha ardayda waxaa lagu tilmaami doonaa xeerar gaar ah oo ka soo baxa Tacliinta.

Qodobka 24aad

*Shuruuddaha shaqada*

Darajooyinka shaqada (categories) ee Guddoomiyaha, hormuudayaasha, barayaasha iyo shaqaalaha kale ee Jaamacadda waxaa la waafajinayaa Sharciga Shaqaalaha Dawladda.

Gunnadaha Guuddoomiyaha, hormuudyaasha, barayaasha iyo shaqaalaha kale waxaa lagu dejinayaa xeer gaar ah.

Qaybta V.

KULLIYADAHA IYO SHAQAALAHA WAXBARIDDA

Qodobka 25aad

*Shaqada Waxbaridda iyo Kulliyadaha*

1. Jaamacaddu waxay yeelan kartaa intii kulliyadood oo hadba loo baahdo.

2. Kulliyad kasta waxay yeelan kartaa waaxaha ama qaybaha loo baahdo.

3. Waaxaha kulliyad kasta waxaa guddoomiye u noqonaya Madax-Waaxeed.

Qodobka 26aad

*Shaqaalaha Waxbaridda*

1. Shaqaalaha Waxbaridda ee Jaamacaddu waxaa ka mid noqonaya:

a) Bare kaaliye;

b) Bare;
t) Bare sare (Professor).

2. Habka magacaabidda, shruudda iyo xaaladaha shaqada waxaa lagu caddaynayaa xeerer qoran.

## Qaybta VI.

## GELIDDA IYO EDEBTA

Qodobka 27aad

*Tallaabooyinka Edebta*

Gelidda, siyaasadaha edebta iyo xeerarka edebta ee Jaamacadda waxaa lagu caddaynayaa xeerar gaar ahaan u soo baxaya.

## Qaybta VII.

## LACAGAHA JAAMACADDA

Qodobka 28aad

*Hantida Jaamacadda*

Hantida Jaamacaddu waxay noqonaysaa guurto iyo ma guurto, waxaa kale oo ay noqonaysaa:

1. Deeq sannadkiiba dawladdu siiso;
2. Waxa ka soo gala ujuurada tacliinta, hibo iyo macaawino la siiyo, haddii ay jiraan;
3. Deeq dawladeed oo kale, mid wakaaladeed, mid ururro caalami ah, mid ka timaadda dalal saaxiib ah iyo dad iskood u deeqa.

Qodobka 29aad

*Dhawridda hantida*

Maaliyadda Jaamacadda waxaa lagu maamulayaa xeer u gaar ah.

Qaybta VIII.

QODOBBADA UGU DAMBEEYA

Qodobka 30aad

*Xeer Hoose*

Madaxweynaha isagoo la tashanaya Xoghayaha wuxuu soo saarayaa xeerar lagu hirgeliyey sharcigan.

Qodobka 31aad

*Burin*

1. Sharciga tirsigiisu yahay 6 ee 1dii Disembar 1969kii waa la baabi'iyey.

2. Sharci ama xeer kasta oo kasoo horjeeda ama aan la socon sharcigan waa bursan yahay.

Qodobka 32aad

Shgarcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu soo saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

# BOGGA LABAAD

## X E E R

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SAHE EE KACAANKA**

**Tr. 24 Oktoobar 1974, L. 127.**

**Xeerka Maamulka Gudaha ee Jaamacadda Ummada.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad, tii 2aad iyo Sharciga 1aad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Jaamacadda Qod. 30aad tirsigiisu yahay 47 ee 23-10-1974;

ISAGOO OGSOON Baahida loo qabo in la dejiyo Xeer Saameeya Maamulka Gudaha ee Jaamacadda;

ISAGOO la Tashaday Xoghayaha Dowladda.

WUXUU XEERAYAA

Qaybta I.

UJEEDOOYINKA SHARCIGAN

Qodobka 1aad

*Ujeedooyinka Guud*

Xeerkani wuxuu saameynayaa arrimaha gudaha ee Jaamacadda gaar ahaana:

a) Waajibaadka ardayda saaran;

b) Habaynta sannadka tacliinta, fasaxyada iyo dejinta barnaamijka waxbarashada;

t) Shuruudaha gelliinka Jaamacadda;

j) Tirada imtixaanka iyo habka loo qaadayo;

x) Edbinta iyo fulinta xeerka usluubta;

kh) Iyo arrimo kale.

Qodobka 2aad

Xeerkan ka sokow, Jaamacaddu waa iney u hogaansanto sharciyada iyo xeerarka dawladda ee gaar u noqon kara.

Qaybta II.

QODOBBO GUUD

Qodobka 3aad

*Imaatinka Casharrada*

1. Arday kasta waxaa waajib ku ah inuusan sabab la'aan uga maqnaan casharrada waxbarashada, qaybaha kale ee barnaamijka waxbarashada iyo wixii kale ee la xiriira;

2. Xafiiska Hormuudka Kulliyad walba waxaa lagu haynayaa Buug lagu sajilo siday ardaydu u timaado casharrada.

3. Arday kasta oo aan casharrada tegin sabab waafi ah la'aanteed, waxaa lagula dhaqmayaa qodobbada ku sheegan qaybta 8aad ee Xeerkan.

Qodobka 4aad

*Beddelka Takhasuska Waxbarashada*

1. Beddelka Takhasusuka Waxbarashada waxaa la soo qoran karaa sannadka hore iyo kan labaad kali ah. Ogolaanshada bedelaadda waxaa leh Golaha Tacliinta oo dhagaysta ra'yiga Guddiga Kulliyadda.

2. Ardayga waxaa loo ogolaan karaa inuu ka baxo Jaamacadda markuu Guddi Takhtar uu ka keeno marag fur caddaynaya inuusan jirro awgeed u wadan karin tacliintiisa.

3. Ardayga uga taga Jaamacadda sabab aan ahayn tan kor ku sheegan, waxaa laga doonayaa wixii kharash Dawladda kaga baxay.

4. Xoghayaha Dawladda wuxuu, mar walba awood u leeyahay inuu arday u ogolaado inuu ka baxo Jaamacadda, isagoo dhagaystay talada Golaha Tacliinta ee Jaamacadda.

Qodobka 5aad

*Ka Tirsanaan*

Ardayna looma ogoola inuu isku qoro Kulliyad wax ka badan ama inuu imtixaan ugu fadhiisto kale isagoon fasax ka haysan Hormuudka.

## Qaybta III.

## SANNADKA TACLIINTA

### Qodobka 6aad

Haddii sharci ama xeer kale lagu beddelin, muddada tacliinta Jaamiciga ahi waa inayan ka yaraan afar sano oo tacliineed sida Qod. 7aad ku tilmaaman.

### Qodobka 7aad

*Sannadka Tacliinta*

1. Sannadka tacliintu wuxuu ka kooban yahay laba kal (Semestre) oo ka hore yahay 22 toddobaad, ka labaadna yahay in ku dhow 24 toddobaad.

2. Kalka hore wuxuu billabmayaa 16kaa Agoosto, wuxuuna Dhammaanayaa 17ka Jenaayo.

3. Kalka labaad wuxuu bilaabmayaa 1da Febbrayo, wuxuuna dhammaanayaa 16ka Luuliyo.

### Qodobka 8aad

*Tacliinta Todobaad*

Haddii aanu sharci ama xeer kale beddelin, tacllinta todobaadku, waxna ay tahay lix maalmood (6) oo mid walba ugu badnaan todoba (7) saacadood ka kooban tahay.

### Qodobka 9aad

*Fasaxa Tababarka*

1. Waxaa jiraya fasax (6) todobaad ah, wuxuuna u qaybsamaa sida hoos ku dhigan:

b) Nasasho 4 todobaad ah ee la qaadanayo sannadka tacliinta nayo.

b) Nasasho 4 todobaad ah ee la qaadanyo sannadka tacliinta dhammaadkiisa; 17ka Luuliyo ilaa 15ka Agoosto.

## Qaybta IV.

## GELIDDA JAAMACADDA

### Qodobka 10aad

*Guddiga gelidda Jaamacadda*

Ogolaanshaha gelidda Jaamacadda waxaa awood u leh Golaha Tacliinta sida ku tilmaaman Qod. 8aad xarafka (kh) ee sharciga tirsigiisu yahay 47 ee 23-10-1974, (Sharciga Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed). liyeed).

Qodobka 11aad

*Shuruudda Gelidda*

Shuruudda gelidda Jaamacadda waa kuwa guud iyo kuwa tacliineed.

Qodobka 12aad

*Shuruudaha Guud*

Shuruudaha guud ee gelidda waxay yihin kuwa hoos qoran:

a) Dhalasho Soomaaliyeed;

b) Dhammays Shaqada Qaranka;

t) Shahaado caafimaad qab ah;

j) Shahaado edeb sami ah.

Qodobka 13aad

*Shuruudaha Tacliineed*

Shuruudaha tacliineed ee gelidda Jaamacaddu waxay yihiin:

a) Shahaadada Dugsiga Sare ama mid la mid ah.

b) Dhammayska Tababarka Dugsiga Hanuuninta ee Xalane ama hawl u dhiganta.

t) Ku guuleysi imtixaannda Jaamacadda.

Qodobka 14aad

*Dhaafid Shuruudaha Qaarkood*

1. Shuruudaha tacliineed ee ku tilmaaman Qod. 13aad qaybta (a) iyo Qod. 12aad ee xeerkan qaybta (b) waxaa laga dhaafayaa dadka Jaamacadda ka qaadanaya tacliin gaar (Special Courses).

2. Shuruudaha guud ama-iyo kuwa tacliineed waxaa laga dhaafi karaa dadka shisheeyaha ah ee loo ogolaado Jaamacadda inay galaan.

Qaybta V.

HABKA GELIDDA JAAMACADDA

Qodobka 15aad

Ardayda doonaysa inay gasho Jaamacadda waxaa laga rabaa in ay u keenaan Diiwaaniyaha Jaamacadda (Register) laba bilood ka hor intaan sannadka tacliintu billaabmin, fooman buuxa ayagoo fulinaya shuruudaha ku tilmaaman qodobbada 12aad iyo kan 13aad ee xeerkan.

Qodobka 16aad

*Sugidda Xaashiyaha (Forms)*

Kolka foomamka iyo xaashiyaha kaleba ay Jaamacadda soo gaaraan, Diiwaaniyaha (Registrar) wuxuu sugayaa in xaashiyuhu ay hagaagsan yihiin, markaas ka dib, ayuu u gudbinayaa Guddiga Gelidda Jaamacadda ee lagu tilmaamay qod. 10aad ee Xeerkan.

Qodobka 17aad

*Hawsha Guddiga Gelidda Jaamacadda*

1. Guddiga Gelidda Jaamacadda wuxuu mar labaad sugaysa xaashiyaha (Forms), wuxuu dhejinayaa imtixaannada gelidda ee loo baahan yahay; wuxuuna korjoog ka noqon doonaa sixidda imtixaannada.

2. Marka sixidda imtixaannadu ay dhammaato, waa in guddiga Geliddu soo saaraan magacyada ardada guulaysatay iyo kulliyadaha ay gelayaan.

Qaybta VI.

SAJILAAD

Qodobka 18aad

*Muddada Sajilaadda.*

1. Ardayda ku guulaysatay imtixaannadii Gelidda Jaamacadda, waa inay iska sajilaan Xafiiska Diiwaaniyaha (Register) hal todobaad ka hor intaanu billaaban Sannadka Tacliinta.

2. Arday kasta waxaa laga rabaa inuu bixiyo qiimaha sajilaadda oo ah Sh. So. 50 (Konton).

Qodobka 19aad

*Tifaftirka Sajillaadda*

Marka ay sajilaaddu socoto, ardayga waxaa laga rabaa inuu la yimaado:

a) Magac buuxa;

b) Jinsi iyo da'da;

t) Heerka aqooneed;

j) Wixii war bixin kale ah.

Qodobka 20aad

*Sajilaad La'aan*

1. Ardayga aan isa-sajilin muddadalagu sheegay xeerkan, dibna

uga dhaca bilowga Sannadka Tacliinta isagoon sabab waafi ah keenin, loo oggolaan maayo inuu Jaamacadda galo.

2. Ayadoo ay-jirto arrinta kor ku tilmaaman, Guddoomiyaha Jaamacadda wuxuu awood u leeyahay inuu u oggolaado gelidda Jaamacadda, ardayga sabab waafi ah keena, haddii uu dib dhaco ilaa bisha Agoosto 30keeda.

3. Xoghayaha Dawladdu wuxuu awood u leeyahay inuu amro marka loo baahan yahay qaadasho ardo cusub oo kulliyadaha gasha bilowga sannadka tacliinta ka dib.

4. Ardayda cusub marka la qaadanayo, waxaa la raacayaa habka ku dejisan Qaybta VI ee Xeerkan.

## Qaybta VII.

## IMTIXAANNADA

### Qodobka 21aad

*Tirada Imtixaannada*

1. Waxaa jiraya, ugu yaraan, imtixaannada hoos-ku qoran:

a) Imtixaanka kalka (Semester Exam.);

b) Imtixaanka sannadka (Yearly Exam.);

t) Imtixaanka dhexe (Sannadka labaad dhammaadkiisa) (Comprehensive Exam.);

j) Imtixaanka ugu dambeeya (Final Exam.);

x) Doodda Qalin-Jebinta (Graduation Thesis).

2. Imtixaannada kor ku tilmaaman ka sokow, waxaa jiri kara tijabooyin (Tests) oo barayaashu qaadi karaan.

### Qodobka 22aad

*Xilliyada Imtixaannada*

Haddii aan sharci ama xeer beddelin, imtixaannada ku sheegan Qod. 21aad ee xeerkan, waxaa loo qaabanayaa sida soo socota:

1. Imtixaannada kalka — oo dhici doona kalka dhammaadkiisa.

2. Imtixaannada sannadka — oo dhici doona dhammaadka sannadka hore iyo kan saddexaad.

3. Imtixaanka dhexe — oo dhici doona sannadka labaad dhammadkiisa.

4. Imtixaanka ugu dambeeya — oo dhici doona sannadka afraad dhammaadkiisa.

5. Dooda qalin jebinta — ka dabeysa imtixaanka sannadka afraad.

Qodobka 23aad

*Nooca Imtixaannada*

a) Imtixaannada kalka iyo sannadka waxay ahaanayaan kuwo koraal ah.

b) Imtixaannada dhexe iyo kuwa ugu dambeeya (Filan) waxay ahaanayaan kuwo qoraal ah. Waxaa raaci kara kuwo tiraab ah (Oral).

Qodobka 24aad

*Imtixaan Qaadista*

1. Imtixaannada ku sheegan Qod. 21aad ee Xeerkan waxaa loo qaadi doonaa sida hoos ku dhigan:

a) Imtixaannada kalka waxaa qaadaya barayaasha Kulliyadda.

b) Imtixaannada Sannadka waxaa qaadaya barayaal uu magacaabo Guddiga Kulliyaddu.

t) Imtixaannada dhexe, Golaha Tacliinta ayaa u magacaabaya Guddi Kulliyad kasta.

j) Imtixaanka ugu dambeeya — waxaa .qaadaya Guddi uu magacaabo Golaha Tacliintu.

2. Tirada iyo Xubnaha Guddiyda Imtixaannada ee kor ku tilmaaman iyo habka loo raacayo waxaa goynaya Golaha Tacliinta.

3. Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxay awood u leedahay inay magacawdo qof ka tirsan ayada oo goob-joog noqda marka imtixaannada la qaadayo.

Qodobka 25aad

*Mahuraanno Dheeraad ah*

a) Ardayda imtixaannada ugu dambeeya (Final) dhiiba, waxaa laga doonayaa dood qalin jebis ah oo la'aanteed aan la qaadan karin shahaadad Jaamici ah.

b) Dooda qalin jebinta ee kor ku sheegan waxaa la hor dhigayaa Guddi uu magacaabo Golaha Tacliintu kaas oo uu Guddoomiye ka noqonayo Hormuud.

t) Guddigu wuxuu shaaca ka qaadi-doonaa go'aannadiisa oo aan kama dambays.

Qodobka 26aad

*Qiimaynta Imtixaannada*

Qiimaynta imtixaannada waxay noqon doonaan sidan hoos ku dhigan:

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| a) | A | Aad u fiican (excellent) | 100 — 85 |
| b) | B | Fiican (Credit) | 84 — 75 |
| t) | T | Ku filan (Satisfactory) | 74 — 60 |
| j) | J | Guul la'aan (Failure) | 59 — 0 |

Qodobka 27aad

*Ku Guulaysiga Imtixaannada*

1. Ardayga waxaa laga rabaa inuu imtixaannada kalka uu ugu yaraanka helo 60% meel-dhexaad maadadaha oo dhan.

2. Imtixaannada sannadka, ardayga waxaa laga rabaa isagoo ku gudbay maadadaha Guddiga Kulliyaddu ay u garatay kuwa madhaafaanka ah (Core Cubjects) 70% inuu maadadaha kale oo dhan 60% oo

Qodobka 28aad

*Magudbayaasha Imtixaannada Kalka*

1. Ardaygii ku dhaca hal maado imtixaannada kalka, waxaa loo oggol yahay inuu imtixaanka, mar kaliya dib u qaato. Kadib hadduu ardaygu dhaco, waxaa dib loo celinayaa hal kal oo kale.

Qodobka 29aad

*Magudbayaasha Imtixaannada Sannadka*

1. Ardaygii imtixaannada sannadka ku dhaca ama dhammaan maadadaha madhaafaanka ah isla markaasna ka gudba maadadaha kale, waxaa dib loo celinayaa hal kal.

2. Ardayga imtixaannada sannadka ka gudba maadadaha madhaafaanka ah, keenay in ka hoosaysa meeldhexaadka maadadaha kale 60%, waxaa loo oggolaanayaa inuu dib u qaato maadadaha uu ku dhacay sannadka tacliinta ee ku xiga ka markaas dhammaaday.

3. Ardayga ku dhaca maadadaha madhaafaanka ah ee imtixaannada sanndka ee isla markaasna keeni waaya meeldhexaadka 60% maadadaha kale, waxaa dib loo celinayaa sano tacliineed.

Qodobka 30aad

*Magudbayaasha Imtixaannada dhexe, kuwa ugu dambeeya*

*iyo dooda qalin jebinta*

1. Ardayga ku dhaca imtixaannada Dhexe ama kan ugu dambeeya waxaa dib loo celinayaa sannad tacliineed.

2. Ardayga la yimaada dood qalin jebin oo an heerkii la rabay gaarsiisnayn waxaa laga doonayaa inuu mar kale ku noqdo.

Qodobka 31aad

*Mar labaad dhicidda*

1. Ardaygii kari waaya inuu ka gudbo imtixaannada ama dooda qalin jebinta mar labaad sida ku tilmaaman Qodobka 29 iyo 30aad ee Xeerkan, waxaa marka laga eryayaa Jaamacadda.

2. Xafiiska Diiwaaniyuhu wuxuu ardaygaas siinayaa marag fur inta sano ee uu Jaamacadda ku jiray.

Qodobka 32aad

*Ogaanshaha Go'aannada Imtixaannada*

Go'aannada imtixaannada waxaa shaaca ka qaadaya Xafiiska Diiwaanka ee Jaamacadda.

Qaybta VIII.

USLUUBTA

Qodobka 33aad

*Eris — Joojin*

Arday wuxuu ku mutaa eris laga eryo Jaamacadda ama uu ka joojin markey:

a) Maxkamadi ku caddayso dambi;

b) Tahay ciqaab edbis ah sida qodobbada xeerkani dhigayo.

Qodobka 34aad

*Guddiyada Edbinta*

1. Waxaa loo xil saaray edbinta ardayda Guddiyada ku dhigan:

a) Guddiga Edbinta ee Kulliyadda;

b) Guddiga Sare ee Edbinta ee Jaamacadda.

2. Ardayga aan oofin ama jebiya qodob ka mid ah qodobbada xeerkan waxaa tallaabooyin edbin ah ka qaadaya Guddiyada ku tilmaaman xubinta 1aad ee qodobkan.

Qodobka 35aad

*Guddiga Edbinta ee Kulliyadda*

1. Guddiga Edbinta ee Kulliyadda wuxuu ka kooban yahay Hormuudka, 3 Bare oo kuwa Kulliyadda iyo laba (2) xubnood oo ka tirsan Golaha Ardayda ee Kulliyadda. Barayaasha waxaa magacaabaya Hormuudka, Ardayda waxaa soo dooranaya Golaha ardayda ee Kulliyadda.

2. Guddigu wuxuu lahaanayaa Xoghaye uu magacaabo Hormuudka Kulliyadda.

3. Guddiga Edbinta ee Kulliyaddu wuxuu fariisanayaa maalinta loo baahdo.

Qodobka 36aad

*Guddiga Sare ee Edbinta*

1. Guddiga Sare ee Edbinta ardayda wuxuu ka kooban yahay Hormuudyaalka Kulliyadaha, waxaana Guddoonshe ka ah Hormuudka Kulliyadda Sharciga.

2. Guddiga waxaa Xoghaye u ah Diiwaaniyaha (Register).

Qodobka 37aad

*Awoodda Guddiga Edbinta ee Kuliyadda*

Guddiga Edbinta ee Kulliyaddu wuxuu awood u leeyahay in uu ardayga ku xukumo:

a) Canaan;

b) Digniin;

t) Joojin tacliinta Jaamacadda muddo aan ka badnayn hal kal;

j) Magdhow — waxyeellada uu u geysto qalabka Jaamacadda;

x) Ka joojin imtixaannada kalka iyo Sannadkaba.

Qodobka 38aad

*Awood Guddiga Edbinta Sare*

Guddiga Edbinta ee Jaamacadda wuxuu awood u leeyhay ciqaabaha hoos ku dhigan:

a) Ka joojin tacliinta Jaamacadda intii ka badan muddo kal ah;

b) Ka joojin imtixaan gelida hal kal;

t) Ka joojin imtixaannada Dhexe ama/iyo kuwa ugu dambeeya;

j) Ka saarid.

Qodobka 39aad

*Habka Fiirinta Dacwadaha*

Habka hoos ku qoran ayaa labada Guddi ku fiirin doonaan dacwadaha edebta:

a) Xoghayaha Guddiga Edebta ayaa qoris ku wargelinaya ardayga dambiga lagu haysto iyo ciqaabaha uu mutaysan karo. Wuxuu u sheegayaa ardayga taariikh iyo waqti go'an uu hor yimaado Guddiga;

b) Marka Guddigu kulmo, ayaa Xoghayuhu u akhriyi doonaa ar-

dayga dacwadda lagu haysto. Waxaana la weydiinayaa inuu qiran yahay iyo in kale.

t) Hadduu ardaygu qirto dambiga, Xoghayaha ayaa dhigaya qirashadaas;

j) Hadduu qiran waayo, waxaa la siinayaa ardayga fursad uu isku daafaco;

x) Marka la dhagaysto ardayga, Guddigu gaar ahaan ayuu garta u naqayaa;

kh) Go'aannada labada Guddi ee Edbinta waa kama dabayn.

Qodobka 40aad

*Go'aannada Guddiga*

Guddigu go'aanka wuxuu ku gaarayaa nin-dheeri, ka dibna waxaa la ogeysiinayaa ardayga go'aanka uu Guddigu gaaray.

Qodobka 41aad

*Ciqaabaha Guddiga Kulliyadda*

1. Ciqaabaha ku sheegan xubnaha (a) iyo (b) Qodobka 37aad (Canaan iyo Digniin) waxaa lagu xukumi karaa ardayga iyadoo ku xiran tahay culayska dambigiisa marka:

a) Tacliinta laga maqnaado, sabab la'aan muddo laba saacadood oo isku xigta;

b) saacadaha casharrada oo la gashado dhar aan ahayn kan Jaamacadda haddii uu jiro.

2. Ciqaabta ku sheegan xubinta (t) (Joojin tacliinta muddo aan ka badnayn hal kal ee Qodobka 37aad waxaa ardayga lagu xukumi karaa iyadoo ku xiran tahay culayska dembiga, marka uu galo dembi ah:

a) Caasinimo cad;

b) Ogolaanshaha ku dhicidda martida aan la ogolayn;

t) Wareejiinta xaashiyaha rasmiga ah ama hallayntooda;

j) Ku kaca dhaqdhaqaad waxyeellaynaya nolosha Tacliinta iyo Bulshada ee Jaamacadda;

x) Gelid la'aan, iyadoo sabab waafi ihii jirin, imtixaannada loo baahan yahay.

3. Ciqaabta ku sheegan xubinta (j) (Gudista khasaarada la gaarsiiyo qalabka Jaamacadda) ee Qodobka 37aad waxaa lagu xukumi karaa iyadoo ku xiran tahay culayska dembiga marka waxyeello la gaarsiiyo qalabka Jaamacadda.

4. Ciqaabta ku sheegan xubinta (x) (ka joojin imtixaannada kalka iyo sannadka) ee Qodobka 37aad waxaa ardayga lagu xukumi karaa,

iyadoo ku xiran tahay culayska dambiga marka imtixaannada noocaas ah ardaygu xado ama khiyaamo.

Qodobka 42aad

1. Ciqaabta ku sheegan xubinta (a) ee Qodobka 38aad (ka joojin Jaamacadda muddo ka badan hal kal) waxaa ardayga lagu xukumi karaa, iyadoo ku xiran tahay culayska dembiga marka:

a) uu ardaygu ku galo imtixaannada kalka iyo sannadka magac aan ahayn kan sajilan;

b) Dib u gal dembiyada ku sheegan qaybaha (2), (3) iyo (4) ee Qodobka 40aad ee Xeerekan.

2. Ciqaabta ku sheegan xubinta (b) ee Qodobka 38aad (ka joojin imtixaanka kal) waxaa ardayga lagu xukumi karaa, iyadoo ku xiran tahay culayska dembiga marka uu:

a) Siro imtixaannada Dhexe;

b) Ku galo imtixaanka Dhexe magac aan ahayn kan sajilan.

3. Ciqaabta ku sheegan Xubinta (t) ee Qodobka 38aad (ka joojin imtixaannada Dhexe iyo kuwa ugu dabeeya) waxaa ardayga lagu xukumi karaa markuu siro imtixaannada Dhexe ama kuwa ugu dambeeya.

4. Ciqaabta ku sheegan xubinta (j) ee Qodobka 38aad (ka saarid Jaamacadda ah) waxaa ardayga lagu xukumi karaa:

a) Marka la raaco Qodobka 31aad xubinta (1) iyo xubinta (a) ee Qodobka 33aad ee Xeerkan;

b) Markuu ka qayb galo, dhiiriyo abaabul iyo ka qayb-gal amar la'aan, bannaanbaxyo aan la ogolayn.

## Qaybta IX.

## QODOBBO MAHURAAN AH

### Qodobka 43aad

*Burin*

Sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda kan waa la buriyey.

### Qodobka 44aad

*Ka bilow*

Xeerkan wuu hirgelayaa marka la saxiixo. Waa in lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle Maxamed Aadan Shekh*
Xoghayaha Dawladda Wasaaradda
Hiddaha iyo Tacllinta Sare

# BOGGA LABAAD

## XEER

**XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA**

**Tr. 14 Nofembre 1974, L. 128.**

**Sicirka Dhuxusha Geedaha.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu arkay Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKII uu arkay Sharciga Lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxay 17ka Juun 1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanka ah;

MARKII uu arkay Xeerka Lambarkiisu yahay 10 ee soo baxay 1da Agosto 1973, kuna saabsanaa sicirka dhuxusha geedaha;

AYADOO la maqlay Guddiga lagala tashanaayay ilaalista sicirka alaabta lagama maarmanka ah;

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Sicirka Dhuxusha Geedaha wuxuu noqodoona sida aanu u goynay ee hoos ku qoran.

Sicirkanu Muqdisho buu ku kooban yahay:

| **Badeecadda** | **Sicir Jumladeed** | **Sicir Tafaariiqeed** | |
|---|---|---|---|
| | Kiintaalki | Kiiladii | Kiintaalki |
| Dhuxul-Geed | 100 kg. ah<br>Sh. So. 18 | Sh. So. 0,22 | 100 kg. ah<br>Sh. So. 22 |

Qodobka 2aad

Qof kasta ee u hogaamsami waaya Qodobka 1aad (Koowaad) ee Xeerkan ku yaala wuxuu mudan doonaa ciqaabta lagu caddeeyay Qodobka 7aad (Xubinta a) kuna qoran sharciga Lambarkiisu yahay 17 ee 17kii Juun 1967.

Qodobka 3aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan galayaa durbaba wuxuu tirayaa xeer kastoo ka soo horjeeda. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 14 Nofembre 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Sax. Jaalle Axmed M. Maxamuud*

---

XEER WASAARADDA BOOSTA ISGAARSIINTA

Tr. 18 Nofembre 1974, L.129.

Tigidh cusub «Sannadguurada 5aad ee Kacaanka».

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Qodobka 22aad iyo kan 23aad ee Sharciga Boostada Lambar 62 soona baxay 22-9-1972;

ISAGOO DHEGEYSTEY Talada Guddiga Filateliga;

ISAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in la soo saaro tigidh cusub oo lagu magacaabo «Sannadguurada 5aad ee Kacaanka»;

WUXUU GUDDOOMIIYEY

Qodobka 1aad

1. In la soo saaro tigidh cusub oo xus ha, laba qiime ah, 4 midabna leh, laguna magacaabay «sannadguurada 5aad ee Kacaanka». Tigidhada waxa lagu soo daabacay Madbacadda Istituto Poligrâfico dello Stato di Roma.

2. Tigidhada waxa lagu sameeyey xaashiyo aan ahayd filigranata, qiyaastooduna waxay ahay 30x40, tigidhada ilkahooduna waxay yihiin 14 labadii sentimeterba; tigidhada dhexdooda waxa ku yaal sawirro ku saabsan Bacaad-celinta iyo Ololaha Horumarinta Reer Miyiga.

3. Qiimaha iyo tirada tigidhada la daabacay waa:

Sh. So. 0,40 tirada la daabacay waa 200.000 midh

Sh. So. 2,00 tirada ladaabacay waa 100,000 midh

Qodobka 2aad

Tigidhada kor ku qoran waxay soconayaan muddo 18 bilood ah laga bilaabo 21 Oktoobar 1974 waxayna dhacayaan 30ka Abril 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Boosta iyo Isgaarsiinta
*G. S. Axmed Maxamuud Faarax*

---

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 23 Oktoobar 1974, L. 130.

Dhul Dowladeed loona gacan geliyay (luibera disponibilità) Jaalle Kafiya Noowel Cabdi, ku fadhiya mq. 532, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Hodan.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lam. 115 soona baxay 13kii Settember 1956;

ISAGA OO ARKAY Faafin Rasmi ah Lamb. 2 R. L. 10 soona baxday 5 Oktoobar 1966, oo caddeyneyaa in Cabdulla Barre Sobrie la siiyay cad dhul Dowladeed ku fadhiya mq. 1064, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Hodan;

ISAGA OO ARKAY Naqashka 1.5655, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, falhigoodii 257aad taariikhduna ahayd 16 Luuliyo 1960;

ISAGA OO ARKAY Naqashka 1.3366 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 5655 lagana aqoonsaday fadhigii 20aad ee guddiga dhimaha Dowaladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 18 Agosto 1974, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO AGOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1050, loona tiriyay Cabdulle Barre Sobriye sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Dhismaha iyo Dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 24 Luuliyo 1974;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Laanta Farsamada Dhulka ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud, taarikhdeeduna aheyd 10-9-1974, taasoo caddeyneysa in naqashka dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar L. 3366 ee 18 Agoosto 1974 laguna haqijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xafadda Hodan laguna siiyay xaashida lam. 3760 ee 2-9-1974 oo Dawladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 6709 Reb. taarikh 7 Luuliyo 1965 lagu diwaan geliyay Xamar 21-7-1965 L. 628, qoraal Dowladeed, buuooa 17 oo ah caddeynta Notaayada Michael J. Mariano taas oo Cabdulle Barre Sobriye ka gaday kuna warejiyay Xaaji Bashir Cismail wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku yaal Muqdisho — Xafadda Hodan;

ISAGA OO ARKAY Qoraal )Atto) L. 4680 Reb. taarikh 18kii Abrile 1974, laguna diiwan geliyay Xamar 20-4-1974, L. 115, qoraal Dowladeed, Buuga 20 oo ah Cadeeynta Notaayada Dr. Muse Xusen Sadiiq taas oo Xaaji Bashiir Ismaaciil ka gaday kuna wareejiyay Kaafiya Nooweel Cabdi wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 532, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka dowladeed (libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis. wuxuu soo saaraya;

XEER

Waxaa dhul dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, (Libera disponibilità) loona aqoonsaday Kaafiya Nooweel Cabdi, dhul ku fadhiya mq. 532, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan.

Muqdisho, 23 Oktoobar 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

---

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

**Tr. 11 Nofember 1974, L. 131.**

**Cad dhuul Dowladeed, la siiyay Jaalle Axmed Cabuud Baxashwaan ku yaal Muqdisho, Degmada Shibis kuna fadhiya mq. 1.416.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. soona baxday 13kii Sett. 1956kii;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 114 soona baxday 23kii maajio 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Axmed Cabuud Baxashwaan markay ahayd 10-5-1957 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Shibis;

ISAGA OO ARKAY Naadada dhulka, kuna saabsan cad ah, la weydiistay, ogaysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 3-8 soona baxdoy 19kii Agosto 1957; iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshada lamb. 9806, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 226aad taarikhduna ahayd 16 Sett. 1958, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolletada lamb. 853432 ee 25-10-1957 kana soo baxday Xafiiska Canshurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Axmed Cabuud Baxashwaan uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 1.200, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO ARKAY dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.200, loona tiriyay Axmed Cabuud Baxashwaan sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farmada dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 18 Jennayo 1954;

ISAGA OO ARKAY arjigii (2) labaad uu keensaday Axmed Cabuud Baxashwaan taarikhdu markay ahayd 31-3-1962 kuna weydiistay «ampliamento» cad dhul dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Shibis kuna fadhiya mq. 216;

ISAGA OO ARKAY Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 10 soona baxday 1 Oktoobar 1962, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 3034, kuna saabsan dhismo darbi oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 312aad taarikhduna ahayd 5 Juun 1963;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 3035, kuna saabsan dhismo darbi oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 312aad taarikhduna ahayd 5-6-1963;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 17858 ee 20-11-1963, kana soo baxday Xafiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Axmed Cabuud Baxashwaan uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 434,50, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 216, loona tiriyay Axmed Cabuud Baxashwaan sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 14-12-1963;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmameyso dhulka isaga ah;

X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Axmed Cabuud Baxashwaan, oo ku yaal Muqdiso — degmada Shibis kuna fadhiya mq. 1.416.
Muqdisho, 10 Nofembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cosmaan*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 39.*

*Mogadiscio, li 18 Novembre 1974.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Ten. Col. ABDULLAHAI WARSAME NUR

---

## BOGGA SEDDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

#### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Abu Sheekh Cismaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 23-10-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar ah 40x30, kuna fadhiya 1200 mdh.
Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul lamb. 15iyo 47.

Koofur Waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul lamb. 20.

Bari Waxaa ka xiga: Dhul lamb. 48.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa aga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon)l maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.
Muqdisho, 9 Nofembfe 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(254)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *BEDDELAAD NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Xuseen Cosoble, maalintii 7-7-74, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Karaan, qaabkiisuna ahaa rektangolaar, addimihiisuna ahaa-yeen 30x20, kuna fadhiye 600 mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka Um-madda sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lam-barkeedu ahaa WHG-3-23-417 ee 28-7-74 oo ka baxday xafiiskaan wa-xay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka Ummadda, qaabkiisuna waa rektangolaar, addimihiisu yihiin 20x16,50, kuna fadhiya 330 mdh., sooh-dimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 36.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 30.

Muqdisho, 9 Nofembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(255)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Warsame Maxamuud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 5-11-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan (4° Km. per Afgoi) oo leh qiyaas trabesiyo 30; 17x18:2, kuna fadhiya 423 mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga Dhul lamb. 3.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 2.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa aga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon)I maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Nofember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(256)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA GEDO

### GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDII uu arkay warqad L. GAR-II-1233 Tr. 24-10-1974 ee Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee Gobolka Gedo uu ku cadeeyay inuu ka lumay Jeegga Wareega L. 003314 Sh. So. 50.000, (konton kun) oo loogu tala galay dhismaha Isbitaalka Garbahaarrey, kuna codsaday in jeeggaas ka lumay baabi'iyo oo loogu bedelo mid kale;

HADDANE uu akhristay warqad L. HB-50-5827 Tr. 26-9-1974 ee Bankiga Qaranka Soomaaliyeed — Qeybta Hawsha Bankiga — taasoo lagu sugay jiritaanka jeeggaas lumay oo aan aheyn mid ku qoran erayga ah «lama xawil karo»;

### WUXUU XUKUMAY

Siduu qabo qobodka 69 ee Xeerka (D.L.) soo baxay 9-9-1965, L. 2. lumidda Jeeggaas Wareega L. 003314 Sh. So. 50.000, Isla markaas.

### WUXUU AMRAYAA

Bankiga Qaranka Soomaaliyeed oo jeeggaas markiisii hore sameeyay inuu cusbooneysiiyo jeeggaas oo ku bedelo mid kale muddo ku siman 15 maalmood laga billaabo marka amarkan lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee J. D. S. haddii aanmucaarado muddadaas dhaxdeeda cid kale keensan.

Luuq Ganaane, 15 Nofembre 1974.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Gedo

(257) *Jaalle Cabdullahi Aadan*

## SHARIKADDA GEER

### OGEYSIIN ISUGU YEERID AH

Waxaa la ogeysiinayaa dadka ku jira Shirkadda GEER Agricola, saldhigeedu yahay Marka in ay ka soo qaybgalaan Shir caadi ah oo laysugu yeeray maalinta 10-12-1974, Xafiiska Garyaqaanka Cumar Xaaji

Moxamed, oo ku yaal wadada 1°da Luuliyo, saacadu markey tahay 16,30 galabnimo waxaana laga hadlayaa:

1. — Miisaaniyadi 1972-1973 iyo ogolaashaheedi;
2. — Magacaabidi Maamuleyashi Shirkadda;
3. — In laga bixiyo dadki aan bixinin saamiqii laga rabay;
4. — Waxyaalo kale.

Shirkaas waxaa laysugu soo noqon karaa mar labaad haddi kan horre uu suro gel noqon waayo 20-12-1974, isla saacadaas.

Waxaa Shirkaas ka soo qayb geli karaa ninki 5 beri ka hor ku qoray buuga Shirkadda sida sharcigu qabo.

SHIRKADDA GEER

(258) *Alberto Bacchi*

---

SHARIKADDA MARMARKA

---

Waxaa saamileyda shirkadda Marmarka iwm. ay ogeysiinaysaa saamileyda oo idil inay ka soo qayb galaan shir aan caadi ahayn oo lagu dhigi doono saldhiggaada ku meelgaarka ah (Wershadda Saabuunta Bayl), Waddadada Maxmad C. Xalane, Muqdisho, taariikhdu markay tahay 13 Jannayo 1975, saacaddu markay tahay 16.30 gelinka dambe. Haddii shirka hore la isugu iman waayo kan labaad wuxuu noqonaya 13 Febraayo 1975 isla saacaddi hore oo kale.

GUDDOMIYAHA

(259) *Jaamac Gaanni Axmad*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

---

Waxaan akhriyey dacwadan, markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga keydsiga iyo amaahda waxaan ogaaday inay tahay shaqadeyda.

Arkty Qcd. 69, D. L. 9-9-65 n, 2.

Waxaan vadeynaya dhumidii Buugga Lacagta (Ammortamento libretto) n. D. R. 3544, Shs. 476,20.

Waxaa amrayaa in loo sameeyo Buugga ninka la yiraahdo Cusmaan Maxamed Saciid, mudo 30 beri ah, oo ay ka bilaabato maalinta lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale ee Dawladda daddaan qofkale oo ku sheeganayo usan jirin.

Waxaa kale la codsaneynaa in buugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita wakaale aan laheyn shaki, iyadoo la sugaayo 30kaas beri oo aan soo sheegnay.

Muqdisho, 30 Nofembre 1974.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(260) *Jaalle Yasiin Shire Faarax*